



## GARGAAR DHAQAN

Soomaali

Nolol-dhaqameedka Göteborg waa iney leedahay wajijo kala duwan lahaataanaa taye sare, waxa sheegay taa gudiga dhaqanka ee Göteborg. Sidaa darteed waxa jira gargaar dhaqaale ee howlaha iyo mashaariicda leh muhimad farshaxan iyo dhaqanba. Waa howlo iyo mashaariic loogu tala galay bulshada ku nool Göteborg kuwaasoo lacag ka heli kara gudiga dhaqanka.

Mashruuc farshaxan, bandhigyo, ruwaayado ama dabaal-degyo ayaa lagu heli karaa gargaarkaa. Farshaxanada waxey kaloooy dalban karaan deeq (stipendium) ama gargaar istuudiyo farshaxan (ateljéstöd). Qoraayada ayaa heli kara deeqo qaasa.

Waxaad jira warbixin iyo hadafka laga leeyahay gargaarka dhaqan oo ku qoran afka iswiidhishka [www.goteborg.se/kulturstod](http://www.goteborg.se/kulturstod)

Codsiga gargaarka dhaqaale wuxuu u dhacayaa qaab adeeg elekoronik (e-tjänst) ee bogga internetka. Email ahaan baad u soo diri kartaa su'aalaha aad qabto iyagoo ku qoran iswiidhish ama ingiriis. Adareeska emailka waa kulturstod@kultur.goteborg.se

[www.facebook.com/goteborgkulturstod](http://www.facebook.com/goteborgkulturstod)

Kulturstöd, Göteborgs Stads kulturförvaltning, Östra Hamngatan 16, 411 09 Göteborg

### Gargaarka howlaha meheradda

Gargaarka howlaha meheradda waxa hela kooxaha xurta ah ee mudo ka shaqeynayey howlaha dhaqan. Gargaarkaa waxa loo ogolaadaa sanad ama sadax sano.

Dadka la siiyo gargaarka howlaha meheradda waxey leeyihiin hadaf dheer ee farshaxanka Göteborg. Howluhu waa iney yihiin kuwo leh tayo sare isla markaana xiise-gelinaya dadka loo danleeyahay. Gargaarka waxa kaloo heli kara howlaha dhaqan ee loo arko iney magaalada Göteborg si qaasa ugu leeyihiin faa'ido siyaasad-dhaqameed.

Waxa loogu tala galay:

Gargaarka waxa la siinayaa oo kaliya dadka xirfadleyda ah iyo howlaha sameynaya xarun hanti ee qeyb dhaqan. Howshaa waa iney sida caadiga ah soconeysyo sanadka oo dhan.

### Gargaar mashruuc

Gargaarka mashruuc ma laha lacag go'an waxana la bixiyaa laba jeer sanadki.

Dalbo gargaar mashruuc ee mashaariicda ka dhacaya Göteborg ee ku saabsan howlaha leh muhimad farshaxanka iyo dhaqanka.

Waxa loogu tala galay:

Gargaarka waxa loo dalban karaa soo saaridda wax soo saar farshaxan oo ka kooban qorsheyn, diyaar-garaw iyo hirgelin iyo u soo bandhigid dadweyne, tusaale ahaan bandhig, jilid ama ruwaayad ka dhaceysa Göteborg. Mashruuca waa in la fuliyaa oo la dhameystiraa waqtii cayiman.

Gargaarka mashruuc waa heli kara oo kaliya ururo. Ururo waxa loola jeedaa kuwo aan faa'iido doon aheyn ama aan ah urur dhaqaale, hey'ad samafal, shirkad qofeed ama shirkad kale.

## **Gargaar mashruuc ee Pronto**

Gargaarka mashruuc ee Pronto waxa la bixiyaa afar jeer sanadki iyadoo lacagta ugu badan ee la bixiyana tahay 40 000 kr mashruuciba.

Dalbo gargaar mashruuc ee Pronto si aad uga fuliso mashruuc Göteborg kaasoo waqtiga lagu fulinayo gaaban yahay isla markaana leh muhimad farshaxanka mid dhaqanba.

Waxa loogu tala galay:

Gargaarka waxa loo dalban karaa soo saaridda wax soo saar farshaxan oo ka kooban qorsheyn, diyaar-garaw iyo hirgelin iyo u soo bandhigid dadweyne, tusaale ahaan bandhig, jilid ama ruwaayad ka dhaceysa Göteborg. Mashruuca waa in la fuliyaa oo la dhameystira waqtii cayiman.

Gargaarka mashruuc waa heli kara oo kaliya ururo. Ururo waxa loola jeedaa kuwo aan faa'iido doon aheyn ama aan ah urur dhaqaale, hey'ad samafal, shirkad qofeed ama shirkad kale.

## **Taageero horumarin**

Taageerada horumarinta cadad lacageed oo go'an malaha waxaana la qaybiyaa hal-labo jeer sannadkii.

Codso taageerada horumarinta mashaariicda dhiirigelinaya farshaxanka ama horumarin dhaqan oo abuuraya tayo ama keenaya isbeddel qaab fikar.

Tani waxay qusaysaa:

Taageerada waxaa loo oggolaadaa dhammaan hawlahu ku saabsan dareen cabiridda iyo tusaale ahaan in xoogga la saaro horumarinta hababka, qaabaynta, xeeladda, horumarinta xirfadda, fikrad bilow ah ama wixii la mid ah. Taageerada horumarinta waxaa loo soo bandhigayaa maamulka laakiin ma jirto shuruud ah in dadwaynaha loo soo bandhigo.

Ururada keliya baa heli kara taageerada mashruuc. Urur waxaan uga jeednaa urur samafal ama urur dhaqaalihiisa la wada maamulo, hey'ad ujeedo gaar ah loo aasaasay, shirkad gaar loo leeyahay ama shirkad (caadi ah).

## **Gargaar istuudiyo**

Gargaar istuudiyo waxa la bixiyaa sanadki mar. Lacagta waxaa iyadoo isla eg loo qeybiyaa farshaxanada la doortay.

Dalbo gargaar istuudiyo ee caawinta kirada istuudiyaha ee dadka farshaxada xirfadleyda ah kana howl-gala Göteborg.

Waxa loogu tala galay:

Codsaduhu waa inuu leeyahay ugu yaraan waxbarasho jaamacad farshaxan ee sadax sano ah kuna saabsan fanka, wax soo saar farshaxan ama sawir, waxbarashadaa oo dhamaatay ugu badnaan sadax sano codsiga ka hor. Gargaarkaa ayaad heli kartaa haddii aad leedahay ugu yaraan waayo aragnimo sadax sano ah ee caddeyn leh oo aad ku soo

bandhigtay meel gooni u baxsan ee goob bandhig dhab ah, sanduuq deeq shaqo ee hey'adda Konstnärsnämnden ama sharaxaad dadweyne ee farshaxan. Gargaarka qof baa la siiyaa waana in canshuur laga bixiyaa.

## **En snabb slant**

Deeqdan ayaa ah inta u dhaxeysa 2000 iyo 20 000 kr iyadoo xili kastaa la dalban karo.

Dalbo En snabb slant haddii da'adaadu u dhaxeyso 18-25 sano oo aad dadweynaha Göteborg u soo bandhigeyso mashruuc dhaqan.

Waxa loogu tala galay:

Haddii aad ka diiwaan gashan tahay Göteborg. Da'daaduna ay u dhaxeyso 18-25 sano. Dalabka waa in la sameeyaa ugu yaraan hal bil ka hor xiliga mashruuca dhaqan la fulinayo. Mashruuca dhaqan waa in loo soo bandhigaa dadweynaha.

Nala soo xiriir inaga bixina gargaarka dhaqan si aad noogala hadasho waxa suura galka ah ee aad mashruuca ku sameyn karto.

## **Deeq qoraa**

Qoraagu wuxuu gudiga dhaqanka ka heli karaa deeq gooni ah ee gaareysa 50 000 karoon.

Dalbo deeqda qoraaga haddii aad qoreyso sheeko dheer ama gaaban ee iswiidhish ah, ruwaayad, gabay iyo musalsal ama aad turjumeysu suugaan. Waa inaad soo saartay ama turjuntay ugu yaraan hal wax soo saar suugaan shantii sano ee ugu danbeysay.

Kuwa ka shaqeeya fanka masraxa waa iney ama qoreen ama turjumeen ugu yaraan laba wax soo saar ee loo isticmaalay ama tebiyey qaab xirfadeed shantii sano ee ugu danbeysay.

Waxa loogu tala galay:

Waa in codsaduhu ka diiwaan geshan yahay farshaxan ahaana ka howl-galaa Göteborg. Waa inaad leedahay waxbarasho farshaxan ama aad ku howlaneyd howl farshaxan caddeyn leh oo xirfadeysan lehna tayo saro ugu yaraan sadax sano. Howl farshaxan caddeyn leh waxa loola jeedaa inaad tahay/aheyd qof la naqdiyey, la siiyey kontarakti ama ka muuqday nidaamyo farshaxan ee kala duwan.

## **Deeq dhaqan**

Deeqda dhaqan ee Magaalada Göteborg ee la eg 30 000 karoon waxa la bixiyaa sanadki mar.

Dalbo deeqda dhaqan haddii aad wax ku soo biirisay nolosha dhaqan ee Göteborg.

Waxa loogu tala galay:

Waa in codsaduhu ka diiwaan geshay yahay farshaxan ahaana ka howl-galaa Göteborg. Waa inaad leedahay waxbarasho farshaxan ama aad ku howlaneyd howl farshaxan caddeyn leh oo xirfadeysan lehna tayo saro ugu yaraan sadax sano. Howl farshaxan caddeyn leh waxa loola jeedaa inaad tahay/aheyd qof la naqdiyey, la siiyey kontarakti ama ka muuqday nidaamyo farshaxan ee kala duwan.

## **Lacagta kaalmada isku dheelitirka ee loogu talogalay carruurta iyo da'yarta**

Lacagta kaalmada isku dheelitirka waxaa si aan kala go' lahayn loo codsan karaa sannadka gudihiisa oo loo oggolaadaa wax soo saar ama shaqo ka socota goob cayiman (100 karoон ilmihiи soo booqdaba markii tigidh lagu iibshay ugu yaraan 40 karoон) ama 50% qiimaha waxaas lasoo saaray ee la iibshay.

Ka codso taageerada hawlaha farshaxanka, wax soo saarrada iyo bandhigyada masraxa lagu qabto Göteborgs Stad (degmada gudaheeda) ee loogu talogalay carruurta iyo da'yarta da'doodu u dhexayso 0-19 sano.

Tani waxay quusaysaa:

Taageerada waxaa lasoo codsan karaa iyadoo codsiga lagu sharaxayo wax soo saar ama hawl diyaar ah.

Ururada keliya baa heli kara kaalmada dhaqaalaha isku dheelitirka. Ururada waxaan ula jeednaa urur samafal ama urur dhaqaalihiisa la wada maamulo, hey'ad ujeedo gaar ah loo aasaasay, shirkad gaar loo leeyahay ama shirkad (caadi ah).